

« Date d'envoi de l'avis »

Gacaliye Waalid/Mas'uul/Arday:

Waxaad helaysaa warqaddan sababta oo ah diiwaanada Santé publique Ottawa -SPO (Caafimaadka Dadweynaha Ottawa-SPO) waxay muujinayaan in diiwaanka tallaalka ardaygani ka maqan yahay ama maclummaad qalad ah.

SPO waxaa looga baahan yahay inay joogteyso oo dib u eegto diiwaanada tallaalka sanad walba ee dhammaan ardayda da'doodu ka yar tahay 18 sano ee Ottawa ka dhigta dugsiga, iyada oo la raacayo *Loi sur l'immunisation des élèves (Xeerka Tallaalka Ardayda Dugsiga)*.

Waxa aad u baahan tahay inaad sameyso si aad u baajiso ka joojinta dugsiga:

Tallaabada 1: Dib u eeg diiwaanka tallaalka iyo tallaalada loo baahan yahay
 Isbarbardhig diiwaankeenna, oo lagu tusmeeyey Ogeysiiska ku lifaaqan, iyo diiwaankaaga guriga yaalla.

Tallaabada 2:

- Haddii ardaygu **uu qaatay** tallaalka (yada) lagu taxay kuwo maqan, cusbooneysii SPO-ka sida lagu qeexay Tallaabada 3aad.
- Haddii ardayga uu **ka maqan yahay** tallaalka (yada) la taxay, fadlan ardayga ha laga siyo tallaalka (yada) dhanka bixiyaha daryeelka caafimaadka, rugta leyska iman karo ballan la'aan ama rugta tallaalka SPO (ballan ayaa loo baahan yahay). **Ogow in tallaaladani yihiin lacag la'aan.** Marka ardaygu qaato tallaalada, fadlan cusbooneysii SPO sida hoos ku qeexan.

Tallaabada 3: Cusbooneysii SPO

Cusbooneysii SPO adigoo isticmaalaya mid ka mida doorashooyinka soo socda, **ka hor taariikhda lagu tilmaamay Ogeysiiska halkan ku lifaaqan:**

- **Onleyn:** www.etreparentaottawa.ca/immunisation. Ogsoonow inaad dib uga cusbooneysiin karto kana arki karto diiwaanka tallaalka ardayga halkan.
- **Appli CanImmunize:** si bilaasha ayaa loo heli karaa iyadoo laga soo dejisanaayo l'App Store d'Apple ama Google Play Store ka.
- **Habab kale: booqo** www.etreparentaottawa.ca/immunisation doorashooyin kale.

Haddii SPO aysan helin diiwaanka tallaalka ee ugu dambeeeyey ama ansixin daaweyn cafimaad oo mideysan ama foom aan caafimaad ahayn oo ka timid ministère de la Santé et des Soins de longue durée (Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Muddada Dheer), ardayga waxaa laga yaabaa in laga joojiyo dugsiga.

Haddii aad u baahan tahay *Déclaration d'exemption médicale* (Qoraal looga dhaafay sabab Caafimaad) ama *Déclaration de conscience ou de croyance religieuse* (Qoraal ku saabsan xagga Damiirka ama Caqiido Diineed), wac 613-580-6744 ama booqo www.etreparentaottawa.ca/immunisation.

Wixii maclummaad dheeraad ah ee looga baahan yahay xagga gelidda dugsiga iyo jawaabaha ku saabsan xagga "Su'aalaha Goorwalba La Weydiyo", fadlan booqo www.etreparentaottawa.ca/immunisation. Fadlan ka wac **Santé publique Ottawa (Caafimaadka Dadweynaha Ottawa)** halkan **613-580-6744** haddii aad qabto wax su'aalo ah, tabashooyin ama aad u baahantay caawimo dheeraada ah kana mid yihiin maclummaad ku saabsan rugaha caafimaadka ee ballan la'aan lasoo geli karo ee ku yaalla meelaha kuu dhow.

Mahadsanid

2019-2020

« Date d'envoi de l'avis »

OGEYSIISKA DIIWAANKA TALLAALKA KALA DHIMAN

Iyadoo la Raacayo *Loi sur l'immunisation des élèves (Xeerka Tallaalka Ardayda Dugsiga)*

Waalidka/Mas'uulka ee/iyo:

MAGACA ARDAYGA
CINWAANKA GURIGA

Aqoonsiga Macmiilka:

Aqoonsiga Tallaalka Ontario:
Taariikhda Dhalashada:
Dugsiga:

Sida ku tilmaaman Xeerka Tallaalka Ardayda Dugsiga (*Loi sur l'immunisation des élèves*), ardayda waa in laga tallaalaan waxyaalahan:

- Gawracatada
- Jadeecada
- Busbuska (dhashay 2010 ama kadib)
- Teetanada
- Qaamo-qashiirta
- Minijeytis Men-C-C (JK ilaa fasalka 6)
- Kixda/Xiiq-dheerta
- Jadeeco-Jarmalka
- Minijeytis MenC-ACYW135 (Fasalka 7 ilaa 12)
- Dabaysha

Sida lagu qeexay Jadwalka Tallaalka Dadweynaha ee Ontario

«MAGACA HORE» «MAGACA DAMBE» Diiwaanka tallaalka ee Santé publique Ottawa - SPO (Caafimadka Dadweynaha Ottawa- SPO):

TAARIIKHDA LA SUIYEY (YYYY-MM-DD)	Gawracatada (Diphthérie)	Teetano (Tétanos)	Kixda/Xiiq-dheerta (Coqueluche)	Dabaysha (Polio)	Jadeecada (Rougeole)	Qaamo-qashiirta (Oreillons)	Jadeeco-Jarmalka (Rubéole)	Busbuska (Varicelle)	Mini-C-C (Men-C-C)	Mini-C-ACYW135 (Men-C-ACYW135)

Ardaygani waxaa laga yaabaa in dugsiga laga joojiyo haddii aanaan helin diiwaanka tallaalka oo dhameystiran ama *Déclaration d'exemption médicale* (Qoraal looga dhaafay sabab Caafimaad) ama *Déclaration de conscience ou de croyance religieuse* (Qoraal ku saabsan xagga Damiirka ama Caqido Diineed) oo kasoo baxay *ministère de la Santé et des Soins de longue durée* (Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Muddada Dheer).

Marka la eego diiwaankayaga kore, diiwaanka tallaalka ee ardaygan waxbaa ka maqan ama waxa ku jira macluumaad qaldan xagga tallaalka(lada) soo socda:

- **Si aad u hesho tallaalada maqan ama qaldan, fadlan tixraac nuqulka foomka Ingiriisiga/Faransiiska ah.**

Fadlan cusbooneysii Caafimaadka Dadweynaha Ottawa (SPO) tan iyo <<Soo celi Kahor Taariikhda>>

Arag tilmaamaha ku lifaaqan

2019-2020

Macluumaadka tallaalka carruurta waxaa ururiya Santé publique Ottawa (*Caafimaadka Dadweynaha Ottawa*) si loo joogteeyo diiwaanka tallaalka sida waafaqsan qaybta 11 ee *Loi sur l'immunisation des élèves (Xeerka Tallaalka Ardayda Dugsiga)*. Su'aalaha ku saabsan ururinta iyo isticmaalka macluumaadkan caafimaadka shakhsi ahaaneed waxaa lagu hagaajin karaa Kormeeraha Caafimaadka Dadwaynaha, Unugga Tallaalka, Santé publique Ottawa (*Caafimaadka Dadweynaha Ottawa*) adigoo ku soo diraya xagga boostada ee 100, promenade Constellation, Ottawa (Ontario) K2G 6J8, telefoon lambarka 613-580-6744, ama iimayl halkan Immunisation@ottawa.ca.